# Wadajir ayaan adduunka u wanaajineynaa.

Mabaadii'da Laanqeyrta Cas

- BANI'AADMINIMO
- EEXASHO LA'AAN
- DHEXDHEXAADNIMO
- MADAXBANAANI
- MUTADAWACNIMO
- CAALAMINIMO
- MIDNIMO

**La soo xiriir ama soo booqo.**

**HELSINKI** Uudenmaankatu 32 A, 00120 Helsinki
09 622 4322, turvatalo.helsinki@punainenristi.fi

**ESPOO** Läkkisepänkuja 2 A 14, 02650 Espoo
09 8195 5360, turvatalo.espoo@punainenristi.fi

**VANTAA** Bangalada Rekola, Sairaalakatu 3, 01400 Vantaa
09 871 4043, turvatalo.vantaa@punainenristi.fi

**TAMPERE** Hämeenkatu 22 C, 33200 Tampere
040 556 6661, turvatalo.tampere@punainenristi.fi

**TURKU** Yliopistonkatu 24 A 15, 20100 Turku
02 253 9667, turvatalo.turku@punainenristi.fi

**nuortenturvatalo.fi**
facebook.com/turvatalo
twitter.com/turvatalo



TUETTU VEIKKAUKSEN TUOTOILLA

Punainen Risti



# *Xaqa uu qofkasta u leeyihiin dad ammaan ah*

Punainen Risti
Nuorten turvatalo



## Waxkasta waxbaa laga sameyn karaa

Caawimaad ma u baahantahay si aad uga gungaarto xaaladda nololeed? Guriga ama meel kale miyeey ka jiraan arrimo aad rabi laheyd in wax laga beddelo?

La xiriir guriga ammaanka Dhallinyarada.

- Caawimaad lacag la'aan ah ayaad degdeg nooga heleysaa.
- Waxaan halkan u joognaa adiga darteed.
- Wadajir ayaan xalka u raadinaynaa.

Guriga ammaanka dhallinyarada waxaa da'yarta iyo ja waalidkaba ku caawiya mutadawaciinta xirfadlayaasha ah ee Laanqeyrta Cas.

> ***Waxaan caawimaad u helaa arrimaha saxda ah iyo marka aan u baahanahay.***
>
> Da'yar, Tampere





## Caawimaad iyo talobixin afar iyo labaatanka saac ah.

Waxaad na weydiin kartaa waxkasta oo ku saabsan arrimaha dhallinyaranimada iyo waalidnimada. Waxaan gacan ka geysanaa dhibaatooyin kala duduwan oo ku saabsan xaaladaha nololmaalmeedka joogtada ah iyo xasaradaha nolosha.

**Deegaanka kumeelgaar ah**
Waxaan da'yarka siineyaa haddii loo baahdo meel nabad ah oo habeenki seexdo. Dhallinyarada iyo qoysaskaba waxaan ka caawineynaa in ay xaaladda nololeed ee dhibka leh u helaan nafis iyo xal.

**Caawimaadda wadasheekeysiga**
Da'yarka iyo qoyskiisaba waxaan u taageernaa islamarkaasna u caawinaa qaab wadasheekeysi. Xalka waxaan wadajir ula raadinaa da'yarka, qoyska iyo hay'adaha kale ee da'yarka taageera. Waalidiintu xittaa waxay taageeradeena u helayaan arrimaha la xiriira waaldinimada.

Mararka qaar arrinta waxaa lagu xallinkaraa wadasheekeysi gaaban, laakiin waan dhegeysaneynaa wakhti dheer iyo marar badanba illaa iyo inta loo baahanyahay.

**Hagaajinta habsami-socodka hurdada**
Waxaan da'yarka ka caawineynaa hagaajinta habsami-socodka afar iyo labaatanka saac ee isku qasmay, kaas oo dhibaato ku ah dhigashada dugsiga iyo qabashada arrimaha kale ee nololmaalmeedka.

**Taageerada xoroobidda**
Waxaan dhallinyarada ka caawinaa in uu iskiis meel u dego iyo u wareegista nolol xor ah.

**Taageerada shabakadda**
Waxaan qeyb ka nahay Chatka Sekasin oo da'yarku qof qaangaar ah oo lagu kalsoonyahay uu kala sheekeysan karo wax kasta oo qalbiga culeys ku ah.

## Taageero deegaan iyo waxqabad mutadawacnimo.

Waxaan hirgelinaa waxqabad bulsho oo xoojiya caafimaadka dhallinyaraa iyo qoysaska. Waxaan bixineynaa fursado looga qeybgalo wanaajinta adduunka.

